

Hagaajinta Joogsiga Baska ee 3rd Ave S iyo Main St


Abuuritaanka meel ammaan ah, la heli karo, oo ah joogsi Bas oo raaxo badan

Dulmarka Mashruuca

Waxaan hagaajineynaa joogsiga baska ee 3rd Ave S ee u dhexeeya S Washington St iyo S Main St si aan u abuurno joogsi Bas badbaado badan, la heli karo, iyo khibrad raaxo leh oo loogu talagalay dadka sugaya baska. Mashruucu wuxuu gacan ka geysan doonaa hagaajinta waqtiyada safarka baska iyo isku halaynta isagoo abuuraya joogsi baska oo si fiican u shaqeeya iyo hagaajinta iyo dib u habeynta wadada.

Waxa aynu naqshadaynaynaa oo aynu dhisaynaa mashruucan anagoo la kaashanayna Metrooga Degmada King. Mashruucani waa qayb ka mid ah Hagaajinta Waddada Baska 3rd Ave si loo hagaajiyo isku xirka gaadiidka iyo isku halaynta mid ka mid ah marinnada Basaska ee aadka loo isticmaalo ee Seattle.

Khariidada Mashruuca



Jadwalka

Gu'ga 2022: Naqshadaynta mashruuca hore

Gu'ga 2023: Naqshad mashruuc oo dhammaystiran

Dayrta 2023: Dhismuhu wuu bilaabmay

Gu'ga 2024: Dhismuhu wuu dhammaaday

Jadwalka mashruuca waa isbedeli karaa.

Naqshadaynta Mashruuca

Horumarinta mashruuca waxaa ka mid ah:

- Ballaarinta waddooyinka lugta
- Dib u rinjiyeynta isgoysyada
- Ku darida iftiinka dadka lugeynaya
- Beerista geedo cusub
- Ku darida astaamo kale oo joogsiga baska oo ay ku jiraan hoyga baska, fadhiga, macluumaadka imaanshaha wakhtiga dhabta ah ee baska, iyo akhriyaha kaarka ORCA

Waxaan ku samaynaynaa hagaajin kale wadada u dhaxaysa S Main St iyo S Washington St si aynu uga caawino basaska inay si habsami leh oo hufan u socdaan. Horumaradan waxaa ka mid ah:

- Dayactirka wadada ku xigta joogsiga baska oo la marinaayo laami cusub oo shub ah
- Dib u habaynta wadada si ay u noqoto dhanka koonfur kaliya
- Dhammaan parkinada baabuurta la dhigto ee dhanka bari ee wadada waa ay hari doonaan, laakiin jihada ayaa loo rogi doonaa

Adeegyada Dadweynaha Seattle waxay sidoo kale dhisi doonaan hagaajinta bullaacadaha duufaanta ee 3rd Ave S iyo S Main St taasoo qayb ka ah mashruucan.

MACLUUMAADKA MASHRUUCA & XIDHIIDHKA

Candace Goodrich, Hogaaminta Wacyigelinta Bulshada
seattle.gov/transportation/3rd-Main-Bus-Stop
3rdandMainBusStop@seattle.gov | (206) 900-8729



King County
METRO




Seattle
 Department of
 Transportation

The Levy to

MOVE SEATTLE





Maalgelinta

Mashruucan waxaa inta badan lagu maalgeliyaa deeqaha Maamulka Gaadiidka Federaalka. Ilaah maalgelinta dheeraadka ah waxaa ka mid ah move Seattle Levy, Metraha degmada King, iyo Adeegyada Dadweynaha Seattle.

La Soco Xogta

Mashruucu marka uu horay u socdo, waxaan heli doonaa macluumaad badan oo aan wadaagno oo ku saabsan naqshadeynta iyo fursadaha jawaab celinta. Booqo boggayaga mashruuca oo iska diiwaangeli iimaylka wixii ku soo kordha si aad xogogaal ugu noqoto!



Sawir koodhkan si aad u booqato boggayaga

MACLUUMAADKA MASHRUUCA & XIDHIIDHKA
 Candace Goodrich, Hogaaminta Wacyigelinta Bulshada
seattle.gov/transportation/3rd-Main-Bus-Stop
3rdandMainBusStop@seattle.gov | (206) 900-8729

